# Taageerada aadan u isticmaali karin maalgelinta NDIS

Somali | Soomaali

## Haddii aad rabto in dukumiintigan lagaa caawiyo

Waxaad heli kartaa qof kaa caawiya:

- inaad fahamto dukumiintigan
- inaad hesho macluumaad dheeraad ah.

Macluumaadka ku saabsan halkaad la soo xiriireyso wuxuu ku qoran yahay dhamaadka dukumiintigan.

## Dukumiintigan waxa u uku saabsan yahay

Wakaaladda Caymiska Naafada Qaranka (The National Disability Insurance Agency - NDIA) ayaa qortay dukumiintigan.

Marka aan isticmaalno ereyga annaga, waxa laga hadlaya waa NDIA.

Waxaan bixinaa Qorshaha Caymiska Naafada Qaranka ama NDIS.

Dukumiintigani wuxuu ku saabsan yahay taageerooyinka aadan ku iibsan **karin** maalgelinta NDIS.

# Maxaa ku jira dukumiintigan?

Kharashka ku baxa nolol maalmeedka 4

Taageerooyinka aan caddaynta ku saleysneyn 5

Taageerada la xidhiidha caafimaadka 6

Taageerada la xidhiidha caafimaadka maskaxda 6

Taageerada la xidhiidha ilaalinta ilmaha (child protection) iyo taageerada qoyska 6

Taageerada la xidhiidha korriimada caruurta ee xilliyada hore ah 7

Taageerada la xidhiidha waxbarashada dugsiga 7

Taageerada la xidhiidha waxbarashada sare iyo waxbarashada farsamada gacanta iyo tababarka 8

Taageerada la xidhiidha shaqada 8

Taageerada la xidhiidha guryaha iyo kaabayaasha bulshada 9

Taageerada la xidhiidha gaadiidka 9

Taageerada la xidhiidha cadaalada 9

Taageerada la xidhiidha daryeelka dadka da'da ah 10

Alaabooyinka iyo adeegyada aan sharciga ahayn 10

Lacagtii kusoo geli jirtay inay kuu bedesho 11

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dukumiintigan 11

Wax badan ka baro NDIA 11

Hel caawimo si aad noola soo xiriirto 12

## Kharashka ku baxa nolol maalmeedka

Kharashka nolol maalmeedka waa waxyaabaha laga yaabo inaad:

- soo iibso maalin kasta
- lacagaha aad bil kasta joogtada u bixiso.

Waxaa jira 8 meelood oo lacagaha nolol-maalmeedka **aadan awoodin** inaad u isticmaasho maalgelinta NDIS.

1. Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid kharashaadka la xiriira hoyga iyo qoyska.

   Kharashaadka la xiriira hoyga iyo qoyska waxaa laga wadaa kharashyada kaaga baxaya meesha aad ku nooshahay.

2. Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid inaad dad kale siiso ama aad lacago laguugu leeyahay isaga bixisid.

   Dad kale siiso ama aad lacago laguugu leeyahay isaga bixisid waxaa loola jeeda lacag aad qof kale siinayso.

   Tusaale ahaan, lacag aad siiso kaniisadda ama masaajidka.

3. Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid inaad kusoo iibsato cunto ama aad kusoo adeegatid.

4. Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid waxyaabaha balwada.

   Tusaale ahaan, sigaarka iyo khamriga.

5. Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid inaad dhar kusoo gadatid ama is qurxin.

   Tusaale ahaan, inaad timaha ku soo jaratid.

6. Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid safarka iyo gaadiidka.

   Tusaale ahaan, inaad fasax-tamashleyn ah ku aado.

7. Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid xayawaanka rabaayada ah.
8. Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid kharashka la xiriira caafimaadka taranka iyo qoyska.

Kharashka la xiriira caafimaadka taranka iyo qoyska waxaa laga wadaa kharashka kaaga bixi kara sidaad ku heli lahayd inaad ilmo dhashid ama uur qaado.

## Taageerooyinka aan caddaynta ku saleysneyn

Caddaynta ku salaysan waxaa laga wadaa in sheygaas la xaqiijiyay inuu waxtar iyo faa'iidaba leeyahay.

Wax-ku-ool macnaheedu waa wax si fiican u shaqeeya.

Faa'iido leh macnaheedu waa wax adiga kuu fiican.

Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid sidii aad ugu kharash gareyn lahayd teerabi badal ah (alternative therapy).

Teerabi badal ah (alternative therapy) waxaa ka mid ah waxyaabaha sida:

- daaweynta loo yaqaan crystal therapy
- daaweynta loo yaqaan cuddle therapy
- daaweynta loo yaqaan gaming therapy

- daaweynta loo yaqaan coaching therapy
- daaweynta loo yaqaan energy therapy.

## Taageerada la xidhiidha caafimaadka

Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid:

- daawaynta dhibaatada caafimaad oo aan qayb ka ahayn naafanimadaada
- daawooyinka
- adeegyada ambalaasta.

## Taageerada la xidhiidha caafimaadka maskaxda

Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid:

- dawooyinka lagu daweeyo dhibaatada caafimaadka dhimirka
- adeegyada caafimaadka dhimirka ee isbitaalka
- daaweynta dhibaatooyinka maandooriyaha iyo khamriga.

## Taageerada la xidhiidha ilaalinta ilmaha (child protection) iyo taageerada qoyska

Ilaalinta ilmaha waxaa laga wadaa marka ilmaha laga caawinayo inay ammaan ku noolaadaan.

Taageerada qoyska waxaa laga wadaa teerabiga (therapy) loogu talagalay qoysaska.

Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid:

- barnaamijyada loogu talagalay waalidiinta
- daryeelayaasha
- la talinta guurka.

La-talinta guurka waa marka qof uu kaa caawiyo dhibaatooyinka guurkaaga.

## Taageerada la xidhiidha korriimada caruurta ee xilliyada hore ah

Korriimada caruurta ee xilliyada hore ah waxaa laga wadaa sida ilmuhu u koraan oo ay u bartaan waxyaabo cusub.

Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid waxyaabaha ay ka midka yihiin xanaanada caruurta.

## Taageerada la xidhiidha waxbarashada dugsiga

Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid:

- dharka iskuulka
- kharashka iskuulka
- buugaagta iskuulka.

## Taageerada la xidhiidha waxbarashada sare iyo waxbarashada farsamada gacanta iyo tababarka

Waxbarashada sare macneheedu waxa weeye waxbarashada timaada marka aad dhamayso dugsiga sare. Tusaale ahaan, jaamacad.

Waxbarasho xirfadeed iyo tababar macneheedu waxa weeye in aad barato wax shaqo ku saabsan.

Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid:

- kharashyada jaamacadda
- adeegyada qof ka shaqeeya meel lagu bixiyo waxbarashada sare.

Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid gaadiid aad ku aadeyso meel waxbarasho ama tababar lagu qaadanayo haddii:

- aad tagi kartid meeshaas kaliga adoon baabuur raacin
- aad isticmaali kartid gaadiidka dadweynaha.

## Taageerada la xidhiidha shaqada

Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid:

- adeegyada shaqada ee naafada
- waxyaabaha aad u baahan tahay si aad u qabato shaqadaada
- isbedel la sameynayo si loo fududeeyo isticmaalka goobta aad ka shaqeyso.

Isticmaalka waxaa laga wadaa qof kastaa wuu isticmaali karaa.

## Taageerada la xidhiidha guryaha iyo kaabayaasha bulshada

Kaabayaasha bulshada waxaa loola jeedaa wax qof walba isticmaali karo. Tusaale ahaan, jardiinooyinka iyo dhismayaasha dadweynaha.

Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid:

- guryaha loogu talagalay dadka u baahan meel ay ku noolaadaan
- adeegyada dadka aan haysan meel ay ku noolaadaan
- waxyaabo la badalayo oo markaas sahlaya in dhismaha gudihiisa lagu dhex socdo.

## Taageerada la xidhiidha gaadiidka

Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid:

- basaska
- tareenada
- taraamada
- gaadiidka loogu talagalay xayawaanka rabaayada ah iyo kuwa wehelka ah.

Xayawaanka wehelka ah waa xayawaan kaa caawinaya inaad dareento deganaan.

## Taageerada la xidhiidha cadaalada

Caddaaladdu waa marka aad dembi gasho oo ay tahay in aad maxkamad tagto.

Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid daryeelka maalinlaha ah ee loo sameynayo qof xiran. Tusaale ahaan, qof xabsi ku jira.

Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid warbixinada xukunka ka hor (pre-sentence reports) ee ku saabsan caafimaadka dhimirka.

Warbixinada xukunka ka hor (pre-sentence reports) waxaa laga wadaa khabiir ayaa u sheegaya garsoorka caafimaadkaaga dhimirka.

Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid inaad qof ku kormeerto ama aad la socotid xaaladooda.

Kormeerka iyo la socodka waxaa laga wadaa qof ayaa hubinaya inaad sameyso waxa lagaaga baahan yahay.

## Taageerada la xidhiidha daryeelka dadka da'da ah

Daryeelka dadka da'da ah waxaa laga wadaa daryeelka aad hesho markaad duqowdo. Tusaale ahaan, markaad 65 jir tahay iyo ka weyn.

Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid adeegyada daryeelka dadka da'da ah.

## Alaabooyinka iyo adeegyada aan sharciga ahayn

Sharci-darro macnaheedu waa wax aan la oggolayn.

Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid wax aan la ogolayn.

Tusaale ahaan, kuma bixin kartid maalgelinta NDIS daroogooyinka sharci darrada ah.

## Lacagtii kusoo geli jirtay inay kuu bedesho

Lacagtii kusoo geli jirtay inay kuu bedesho waxaa laga wadaa lacag aad hesho haddii aad:

- shaqo aadan haysan
- aadan shaqeyn karin.

Ma **awoodid** inaad maalgelinta NDIS u isticmaashid waxyaabaha ay ka midka yihiin deyn aad iska bixinayso.

## Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dukumiintigan

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan dukumiintigan, fadlan nala soo xiriir.

Waxaad na soo wici kartaa **1800 800 110**

Waxaad noo soo diri kartaa iimayl **enquiries@ndis.gov.au**

Waxaad si toos ah u booqan kartaa mid ka mid ah xafiisyadeena

Waxaad ka heli kartaa xafiiska deegaankaaga mareegaha NDIS. **ndis.gov.au/contact/locations**

## Wax badan ka baro NDIA

Booqo mareegaheena **ndis.gov.au**

Nagala soco kanaaladeena bulshada

**Facebook-ga**, **Twitter**, **Instagram**, **YouTube**, **LinkedIn**

## Hel caawimo si aad noola soo xiriirto

Dadka u baahan in laga caawiyo luuqada Ingiriiska waxaad ka wici kartaa:

Adeegga Fasiraada iyo Turjumaada (Translating and Interpreting Service - TIS). **131 450**

Dadka dhegoolka ah ama maqalku ku adag yahay Waxaad isticmaali kartaa:

Adeegga Gudbinta Qaranka. **relayservice.gov.au**

Waxaad isticmaali kartaa qaabka telefoonka qoraalka (text telephone mode - TTY). **1800 555 677**

Waxaad isticmaali kartaa gudbinta codka. **1800 555 727**